Ombudsman Western Australia

XAASHIDA MACLUUMAADKA

Sida cabasho loogu gudbiyo Ombudsman-ka

Somali/Soomaali
Muraajaco Juun 2009

Cabasho ma ka qabtaa waaxyaha Dowladda Gobolka, wakaalad ama magaalo, degmo ama laanta deegaanka? Ombudsman-ka ayaa la arkaa inuu kaa caawimi karo.

Ombudsman waa qof madaxbanaan oo dhex-dhexaad ah, kaas oo baara cabashooyinka ka yimaada dadweynaha ee loo qabo hawlaha maamul ee ay qabtaan xukuumadda Galbeedka Australia, kuwaas oo ay ka mid yihiin wasaaradaha dowladda, hey'adaha sharciga, dowladda hoose, xabsiyada, dugsiyada, TAFE, Jaamacadaha, magaalooyinka, degmooyinka iyo laamaha deegaanka.

Yoolka Ombudsman-ku waa inuu u adeego baarlamaanka iyo dadka Galbeedka Australia isagoo:

- Xalinaya cabashooyinka laga qabo go'aamada ay gaaraan xukuumadaha dowladdu; iyo
- Hagaajinta heerka maamul ee dowliga ah.

Ombudman-ku wuxuu ku caawiyaa wakaaladaha iney heerarkooda maamul sare u qaadaan isagoo:

- Muujinaya sababaha dhibaatooyinka oo ka talo bixinaya isbedelada nidaamyada la raaco, dabakhaadda, qorshaha hawlaha ama xeerarka si looga hortago in dhibaato taas la mid ah ay dhacdo; Iyo
- In uu ku dhiirigeliyo iney wakaaladaha dowliga ah sameystaan, nidaamkooda u gaarka ah waaxahooda cabashooyinka u qaabilsan.

Qofkasta adeegyada Ombudsman-ku waa u lacag la'aan.

Eed Sheegasho

Haddii aad cabasho u gudbiso Ombudsman-ka, Waa iney ahaataa wax adiga qof ahaan kugu dhacay ama ku saameeyey adiga oo la macaamilaya heya'adaha dowliga ah ee Galbeedka Australia. Intaadan u soo cabanin Ombusman-ka waa inaad isku daydaa inaad dhibaatada xal kala gaarto hey'adda ku shaqada leh. Hadaadan hubin heya'adda aad cabaneyso iney tahay mid Ombudsman-ku baari karo, fadlan nala soo xiriir si aan kaala talinno.

Baaritaan Ombudsman kuma sameyn karo shakhsiyaad iyo ururo gaar loo leeyahay sida:

- Bangiyada, dukaamada, dadka farsamo-yaqaanka ah
- Muranka dhex mara dad shakhsiyaad ah (sida dhibaato daris ka dhex dhacda) ama
- Go'aanno ay wasiirro dowladeed gaareen, maxkamadaha iyo saraakiisha qaarkood.

Ombudsman-ku caadiyan ma baaro 12 Bilood ka hor eedo aad ogeyd oo aadan ka soo cabanin kuwo dib loo eegi karo ama maxakamad racfaan looga qaadan karo. Haddeynan wax ka qaban Karin cabashadaada, sababta waan sharaxeynaa, haddii ay ku haboon tahayna waxaan kugu caawimeynaa inaan kula xiriirinno wakaaladaha ama qofka wax kaa caawimi kara. Ombudsman-ku talo sharci ma bixiyo.

Cabasho qoraal ah uun aqbalaa xafiiska Ombudsman, kaas oo dabadeed loo tixgeliyo in la baaro. Arinka aad ka cabaneyso oo faahfaahsan waa inaad Ombudsman-ka u soo gudbisaa, taas oo ay ku jirto wixii dukumiinti ah ee khuseeya iyo isgaarsiin leys weydaarsaday. Xafiiskeenna ama bogeenna internetka ayaa laga heli karaa foomka cabashada. Arimaha qaarkood, qof kale ayaad u xilsaaran kartaa inuu cabashada kuu gudbiyo. Haddii Ombudsman-ku go'aansado inuu baaro cabashadaada, wuxuu macluumaad dheeraad ayaa lagala xiriirayaa hey'adda aad ka cabaneyso. Haddii ay lagama maarmaan noqoto, waxaa la arkaa in lagu weydiiyo macmuulaamaad faahfaahsan oo dheeraad ah.

Nala soo xiriir

Cabashadaada boosto ayaad ku soo diri kartraa, fakis ama email, ama adigoo isticmaalaya cinwaanka hoosta ku qoran ayaad xafiiskeenna keeni kartaa. Si aad noola soo xiriirto, haddii aad caawimaad turjumaan u baahan tahay, telefoon u dir adeegga turjumaadka (TIS) Qaranka 131 450 ee ka sharciyeysan Wasaaradda soo galootiga iyo wadiniyiinta, taas oo qofkasta ama urur kasta oo Australia ku sugan ay heli karaan 24kii sac, maalin kasta, todobaada maalmoodba.

Ombudsman-ka Galbeedka Australia
Level 12, 44 St Georges Terrace Perth WA 6000 • PO Box Z5386 St Georges Terrace Perth WA 6831
Tel 08 9220 7555 • wicis bilaash ah 1800 117 000 (meelaha ka baxsan magaalada Perth keliya) • TTY 133 677 • TIS 131 450
Fakis 08 9325 1107 • Email mail@ombudsman.wa.gov.au • bogga internetka www.ombudsman.wa.gov.au

Hanaanka loo maamulo cabashooyinka.

Dhib ma ku qabtaa adeegga ay fidiso dowladda WA.

Marka hore la hadal, dadka jooga heya'daha dowliga ah.

Tusaale: qofka aad markasta la macaamisho, sida sarkaalka kiiskaaga qaabilsan ama maamulaha qurvaha.

Hadaan dhibka la xallin,

La hadal qofka masuulka ah ama qeybta cabashada ee wakaaladda.

TELEFOONADA QEYBAHA CABASHADA EE WAKAALADAHA

Rugta agaasinka cabashooyinka ee Booliiska (police)- 9223 1000

Waaxda guryaha ee isuduwaha jawaabcelinta macaamiishar (Housing)-
1800 257 677

Waaxda Dhowrista Caruurta, Unugga Maamulka Cabashooyinka (child Protection) - 1800 013 311

Waaxda Waxbarashada, Unugga Maamulka Cabashooyinka (Education) - 9264 4740

Maxaa dhacaya, haddaan weli dhibkii la xallin?

Ka wac Ombudsman-ka 9220 7555 ama 1800 117 000 (meelaha magaalooyinka ka baxsan waa bilaash).
Haddii aad turjumaan u baahan tahay ka Wac TIS 131 450.

Adiga (ama turjumaankaaga) ayaan dhibka kala hadleynaa. Waxaan isku dayeynaa inaan ku caawinno. Waxaa laga yaabaa inaan ku weydiisanno qoraal.

Soo qor cabashadaada oo u soo dir Ombudsman.

Haddii ay adag tahay inaad cabashadaada qorto, anaga ama qof kale sida turjumaan weydiiso,

Waan eegeynaa cabashadaada waxaanan kuu sheegeynaa waxa aan ka qabaneyno.

Qof ku caawimi kara ayaan isku dayeynaa inaan kula xiriirinno haddi aynaan ku caawimi Karin.

Haddii aan wax kuu qaban karno.

Waxaa la arkaa inaan macluumaad dheeraad ah inaan weydiisanno adiga ama hey'adda aad ka cabaneyso.

Waan kugu wargelin doonaa natiijada.

Haddii aan ogaanno in wax khaldan yihiin, adiga iyo wakaaladda ayaan kala hadleynaa si loo saxo.

Ombudsman-ka Galbeedka Australia
Level 12, 44 St Georges Terrace Perth WA 6000 • PO Box Z5386 St Georges Terrace Perth WA 6831
Tel 08 9220 7555 • wicis bilaash ah 1800 117 000 (meelaha ka baxsan magaalada Perth keliya) • TTY 133 677 • TIS 131 450
Fakis 08 9325 1107 • Email mail@ombudsman.wa.gov.au • bogga internetka www.ombudsman.wa.gov.au